



XAASHIDA XAQIIQDA

Xanuunka Qoor-gooyaha Bakteeriyadu Keento: Cudurka Meningococcal

Waxa uu yahay cudurka meningococcal

Cudurka meningococcal waa jiro ay sababto bakteeriyada ‘Neisseria meningitidis’, sidoo kale loo yaqaan “meningococcal bacteria.” Waxaa jira 13 kooxood oo kala duwan, ama kooxo bakteeriyada ah “serogroups,” oo ah *N. meningitidis*. Sagaashan ka mid ah 100 dhacdooyinka jiro ee cudurka meningococcal waxaa sababa kooxaha A, B iyo C inkasta oo qayb ka mid ah dhacdooyinka jiro ee ay sababaan W, X iyo Y sii kordhayaan.

Waxa aanu ahayn cudurka meningococcal

Dad badan ayaa isku qalda qoor-gooyaha ‘meningitis’ iyo cudurka meningococcal. Si kastaba ha ahaatee, sida ay u dhigan yihiin waa kuwo kala duwan. Qoor-gooyaha ‘meningitis’ waa infekshan ku dhaca dareeraha ku wareegsan maskaxda iyo xangulaha. Waxyaalaha kale ee sababa qoor-gooyaha ‘meningitis’ waxaa ka mid ah fayrasyo, bakteeriyada, fungi, deris-ku-noolayaal, amoebas iyo dhaawacyo.

Halisaha

- Cudurka meningococcal wuxuu dilaa qiyaastii 10 ka mid ah 100 qof ee kasta ee xanuunka qaba — xataa marka la daaweeyo.
- Kuwa badbaada, qiyaastii 10 ilaa 20 oo ka mid ah 100-ka qof waxaa soo gaari doonta naafanimada sida maqalka oo ka luma ama gacan/lug ay beelaan, dhaawac ka soo gaara maskaxda ama kalyaha, dhibaatooyin soo gaara habdhiska maskaxda, ama xagtin aad u daran oo ka soo gaarta maqaar la daboolay.

Yaa halis ugu sugan?

Inkasta oo qof kastaa qaadi karo cudurka meningococcal, dadka qaar ayaa halis aad ah ugu sugan, kuwaasi oo ay ka mid yihiin:

- Carruurta da’doodu ka yar tahay 1 sano
- Dhallinta koraysa iyo dhallinyarada waaweyn ee da’doodu tahay 16 ilaa 23 jir
- Khabiirada shaybaarka ee sida caadiga ah ugu shaqeeya bakteeriyada meningococcal
- Dadka qaba xaaladdo caafimaad oo gaar ah ama qaata daawooyinka qaarkood oo saameyn ku yeesha habka difaaca jirka
- Dadka halista ku sugan sababtoo ah iyadoo uu ka dillaacay degaanka bulshadoodu ku nooshahay

Sibee buu cudurka meningococcal u faafaa?

Cudurka meningococcal waxaa la faafiyaa marka qof aan qabin xanuunku taabto marka qof qaba xanuunka ama dareeraha cunaha (dhibcaha ka soo baxa hindhisada, candhuufta). Tani waxay dhacdaa marka la isku soo dhawaado/la is-taabto, sida:

- Kuwada noolaanshaha isla hal guri
- Dhunkashada
- Qufaca iyo hindhisada aanan la daboolin
- Wadaagista qaadada/fargeetada ama suxuunta
- Wadaagista weelasha wax lagu cabo (tusaale, koobabka, qasacadaha beer-ka ama soodhaha)
- Wadaagista qalabka sigaarka lagu cabo (tusaale, sigaarka, sigaarka duuban ee marijuana, sigaarka elektarooniga ah ‘e-cigarettes’)

Cudurka meningococcal wuu faafi karaa ilaa laga waayayo bakteeriyada ku jirta marka ama afka; sidoo kale waxaa la faafin karaa ilaa 24 saacadood ka dib marka daawooyinka antibiotics la bilaabo. Si sahlan looma faafiyo sida hargabka caadiga ah ama hargabka daran ‘flu’ oo kale, laakiin waa in aad qaado tallaabooyin aad naftaada ku ilaalinayso.

Ka hortagga

- Had iyo jeer samee nadaafadda gacanta ee wanaagsan. Isticmaal saabuun iyo biyo ama ka boqolkiiba 70 aalkolada ka kooban ee gacmaha lagu nadiifiyo.
- Dadka ha la wadaagin maacuunta, weelasha wax lagu cabo, qalabka sigaarka lagu cabo, rumayga/cadayga, waxyaabaha la isku qurxiyo.
- Dabool qufaca iyo hindhisada.
- Qaado daawada ka hortagga ama “prophylaxis,” ka dib marka laga yaabo in xanuunku ku soo gaaro haddii uu daryeel caafimaad bixiye taasi ku taliyo.
- Tallaal qaado.

Ogow: Tallaalada caadiga ah ayaa la helayaa iyadoo sida caadiga ah laga helo in ay kaa illaaliyaan kooxaha A, C, W iyo Y. **Tallaalada caadiga ah ee qoor-gooyaha ‘meningitis’ ma daboolaan MenB.**

Kooxda B, ama MenB, tallaalku waxaa laga yaabaa in la iskula taliyo marka uu dillaaco noocan cudur ee meningococcal. **Ha u** qaadan in uu shaqayn doono tallaalkii hore ee qoor-gooyaha meningitis’ haddii mas’uuliyiinta caafimaadka ku taliyaan tallaalka MenB marka ay jiraan dhacdooyin ama cudur ka dillaaco meel kuu dhow. Weydii daryeel caafimaad bixiye haddii aad hayso su’aalo ku saabsan taariikhdaada tallaal ama talooyinka mas’uuliyiinta caafimaadka.

Calaamaddaha iyo astaamaha cudurka

Cudurka meningococcal si degdeg ah ayuu u socon karaa. Ogaanshaha jirada ee wakhtiga hore waxay ka hortagi kartaa naafanimo halis ah iyo xataa dhimasho. Calaamadaha hore ee jiradu waxay la mid tahay jirooyinka kale ee caadiga ah waxaana laga yaabaa in ay adag yahay in la aqoonsado. Waxay qaadan kartaa 10 maalmood si loo dareemo xanuunka ka dib marka qofka ay soo gaarto bakteeriyada meningococcal.

Qoor-gooyuhu **‘meningitis’** waa habka ugu badan ee cudurka meningococcal u saameeyo jirka. Calaamadaha waxaa ka mid ah:

- Xumad
- Qoorta adayg
- Matag
- Jahwareer
- Madax xanuun
- Lalabo
- Iftiinka oo loo nuglaado

Infekshanka meningococcemia, oo loo yaqaan “bacteremia” ama “sepsis,” waa hab aad u daran oo cudurka meningococcal u saameeyo jirka. Waa infekshan dhiiga soo gaara oo ay sababto bakteeriyada meningococcal. Tani waxay keenta xididdada dhiigga oo xinjirooba, cadaadiska dhiigga oo aad u hooseeya iyo ama xubnaha jirka oo shaqayn waayo. Calaamada waxaa ka mid ah:

- Xumad
- Daal
- Garaac iyo xanuuno aad u daran oo soo
- Qarqaryo la jaraynayo
- Gaara muruqyada, isgoysyada jirka, laabta ama caloosha
- Neefshasho degdeg ah

Marka ay tahay in daryeel la raadsado

Dadka isku arka xumad uu la socdo madax xanuun aad u daran, qoorta oo adkaata, finan ama jahwareer waa in ay raadsadaan daryeel caafimaad. Raadso daryeel degdeg ah haddii isbedeladu ay yihiin kuwo aan caadi ahayn oo lama filaan ah ama yihiin kuwo daran.

Daaweynta

Daawooyinka antibiotics waa koorsada caadiga ee lagu daaweeyo cudurka meningococcal ee bakteeriyadu keento. Cudurka si degdeg ah ayuu u socon karaa haddii qofku aanu si dhakhso ah u helin daawooyinka antibiotics.

Oregon
Health
Authority

WAAXDA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA
Ka hortagga Cudurada Daran ee la isku Gudbiyo
971-673-1111

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. La xiriir Ka hortagga Cudurada Daran ee la isku Gudbiyo 971-673-1111 ama email u dir ohd.acdp@state.or.us. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.